Wargelin ku saabsan qorshaha waxbarida iskuulada aasaasiga ah ee Vantaa inta lagu jiro xaalada aan caadiga ahqayn 18.3.– 13.4.2020

Waxbarashada aasaasiga ah waxaa inta badan lagu bixinayaa barashada masaafada-go laga bilaabo 18.3.2020. Qorshaha waxbaridani waxay ku qotontaa go'aamada ay gaadhay dowladdu 16.3.2020. Qorshayaashaan waxaa loo sameeyay si looga hortago fiditaanka cudurka coronavirus.

Waxbarashada aasaasiga ah iyo hagitaanka waxaa loo qorsheeyey iskuulada aasaasiga ah ee Vantaa inta badan iyada oo laga dhigay waxbarashada masaafada-fog 18.3.– 13.4.2020. Inta lagu jiro xilligaa, barashada waxbarida xirrirka dhow ee iskuulka lama qaban doono marka laga reebo xaalado gaar ah oo aan kor ku soo sheegnay.

Waxbarashada masaafada-dhow(iskuulka) sida soo socota ayaa qorsheeyey:

1. Waxabarida masaafada-dhow(iskuulka) ayaa loo qorsheeyey caruurta dhigta fasalada 1 ilaa 3, kuwaasoo waalidiintood ay yihiin kuwa haya shaqooyin bulshada u muhiim ah, shaqa-bixiyeyaashuna ay waajib uga dhigeen in ayan shaqada ka maqnaanin. Kuwaana waxaa ka mid ah adeegga bulshada iyo caafimaadka, booliiska, badbaadinta, xudduda, caafimaadka, cuntada, tamarta iyo maareynta qashinka, maaraynta dhibaatooyinka, isgaarsiinta, warbaahinta, gaadiidka, amniga saadka, biyaha, fayadhowrka, iyo adeegyada maaliyadeed.

2. Waxbarashada masaafada-dhow(iskuulka) sidoo kale waxaa la siiyaa ardayda u baahan taageero gaar ah, kuwaasoo waalidkood ayan ku xanaanayn karaynin guriga. Dowladda

waxay ku talinaysaa in curuurtu ay wax ku bartaan guriga, haddii ay suurtagal tahay.

3. Naadiyada subaxdii iyo galabtii ardayda fasalka 1aad iyo 2aad waxaa keliya oo loo qaban karaa ardayda la aaga ah waxbarashada masaafada-dhow..

4. Waxbaridda iyo nashaadaad maalmeedka ayaa sida caadiga ah loo fidiyaa dhammaan ardayda fasallada 1aad ilaa 9aad ee Waxbarashada Naafada. Adeegyada Taksiga sidoo kale waxay u shaqeeyaan si caadi ah. Waalidiinta ardaydu waa in ay soo wargeliyaan, haddii uu ardaygu ka baaqanayo soo qaadida taksiga sidii caadiga ahayd.

5. Cuntada iskuulka waxaa xaq u leh ardayda wax ku barata masaafada-dhow(iskuulka)

Baahidka waxbarida masaafada-dhow(iskuulka) Waalidiintu waxay ku wargelinayaan maamulaha iskuulka hababka Wilma ama emayl.

Qorshaha waxbarida masaafada-fog (aan iskuulka ahayn)

Waxbarashada masaafada-fog waxaa loo samayn karaa habab kala duwan. Ujeeddadu waa in la abuuro hab ardayga iyo macallinka ay isula falgalaan oo ay u sugaan waxbarashada ugu wanaagsan ee suurtagalka ah.

Habka ardayda lagu gaadhsiinayo casharada iyo layliyada ayaa inta badan loo marayaa habka Wilma, haddii aysan jirin hababkale haddii oo macalinka lagula heshiiyey. Qorshaynta

waxbarashada masaafada-fog ee ardayda waxay noqon kartaa laylis elektiroonig ah, meelaynta buugaag iyo buugga qoraalka,ama si kale oo lagu heshiiyey. Intaa waxa u dheer, iskuulka ayaa ku dejin doona jadwalka waxbarashada masaafada-fog

Mabda 'ahaan, ardaygu waa inuu ka qaybqaataan xaaladaha waxbarida hore loogu heshiiyey ee ay raacaan qorshaha macalinka. Waalidiinta waxaa laga filayaa inay ku taageeraan ardayda waxbarashadooda iyo inay xoogga saaraan muhiimadda ay leedahay barashada madaxbanaan. Ka shaqaynta casharada waa in loo diyaariyaa waqti iyo deganaan waxbarasho.

Macallinka ayaa ka mas'uul ah qorshaha waxbarida iyo qiimaynta waxbarashada. Qorshaha waxbarashada masaafada-fog waxa la tixgelinayaa da'da ardayda iyo waaya-aragnimadoodii hore ee ku shaqaynta aaladaha iskuulka.

Iskuuladu waxay bixiyaan tilmaamo ku saabsan sida loo isticmaalo Chromebook ama aalado la mid ah inta lagu jiro barashada masaafada-fog. Ardaygu sidoo kale wuxuu isticmaali karaa aalado u gaar ah, taleefanka casriga ah wuu ku bilaabi karaa. Ardaydu waa inay mas'uuliyada gaar ah iska saaraan agabka ama qalabka iskuulka.

Ardaydu waxay ku galayaan aaladda aqoonsiga u gaarka ah ee shabakadooda (opp.eduvantaa.fi). Dhammaan barnaamijyada loo adeegsado waxbarashada masaafada-fog waxay ku duuban yihiin shabakada, umana baahna in la soo dejiyo. Qalabka uu dugsigu bixiyo waxaa lagu xiri karaa shabakad guri ama shabakad talefon. Macalimiinta iskuulka ayaa ku siin doona tilmaamo faahfaahsan oo ku saabsan ka waxbarashada

masaafada-fog iyo barnaamijyada la isticmaalayo, waxayna ku siin doonaan macluumaad dheeri ah haddii loo baahdo.

Soo wargelinta maqnaanshaha

Haddii ardaygu aanu awoodin inuu soo xaadiro waxbarashada masaafada-fog, xanuun ama sababo kale darteed, waalidka ayaa soo wargelin doona maqnaanshaha sidii caadiga ahayd Maqnaanshaha waxaa lagu wargelin doonaa habka fariinta Wilma iyada oo lagu calaamadiyo ardayga " Oggolaansho maqnaansho" ee maalinta la maqan yahay.

Adeegga waxbarashada

Adeegyada soshalka iyo cilminafsiga ee iskuulka ayaa caadi ahaan u shaqaynaya 18.3.– 13.4.2020.Adeegaha soshalka iyo ka cilmi nafsiga ayaa sida caadiga ah lagula soo xiriiri karaa taleefan ama farriinta Wilma. Isbeddellada macquulka ah ee daryeelka caafimaadka iskuulka ayaa la soo sheegi doonaa goor dambe.

Aynu si wadajid ah uga hortagno in coronavirus-ku sii faafo

Waxaan ku dadaalnaa inaan si wanaagsan u abaabulno adeegyada inta duruufaha gaarka ah lagu jiro. Duruufaha gaarka ah waxay u baahan yihiin midayno awoodahaeena masuuliyadeed. Waxaa muhiimah in la raaco tilmaamaha la bixiyay. Tilmaamaha ayaa looga dan leeyahay in looga hortago isu-dhawaanshaha, sidaa darteedna looga hortago faafitaanka cudurka coronavirus. Arrinka waxaanu ku xoojinaynaa si gaar ahaana dhalinyarada. Ujeeddada ayaa ah in ardaydu ay waxbartaan maalmaha iskuulka iyadoo la raacayo qawaaniinta iskuulka u degsan yahay. Sidoo waqtiga firaaqada, shuruucda

gaarka ah ee Dowlada ee ku wahjahan xaaladan gaarka ah, waa in lagu dhaqmaa.

Waajibaadka dhammaan waalidiintu, waa in ay hubiyaan dareenka nabadgelyo ee gaar ahaan caruurta iyo dhalinyarada.

Adkaysi baddan dhammaan bulshada Vantaa ee duruufaha gaarka ah!

Vantaa 17.3.2020

Katri Kalske

Ilkka Kalo

Anders Vikström

ku xigaha badhasaabka Magaalada,

Agaasimaha waxbarashada aasaasiga ah ,

Agaasimaha adeegyada bulshada iswiidhishka